

Siyaasadda GBGB- Badbaadada iyo Amniga Shaqi Ahaaneed ee Shaqaalaha

Nidaam hawleedyadan soo socda ayaa la raaci doonaa xaaladaha weerarka, dhaqanka xun, dhibaateynta, sheegasho khalad ah oo ku saabsan garasho hore oo ah ku xadgudubka carruurta, ama xadgudub dembi ah oo uu sameeyo arday taasi oo ku aadan macalin ama shaqaale dugsi.

Nidaam hawleedyadan oo kale ayaa la raaci doonaa xaaladaha burburka ah taasi oo uu ardayga u geysto hantida qofku uu leeyahay sida macalinka ama shaqaalaha dugsiga dhibkaasi oo ka dhaca dhismooyinka degmada dugsiga.

1. Macalinka ama shaqaalaha ayaa u qori doona fayl dacwo ah maamulaha dhismaha, maareeyaha" xafiiska iyo Guddiga Waxbarashada.
2. Maamulaha, kadib marka la helo rasiidka dhammaan cabashada iyo daliil ku filan oo dacwooyinka ah, ayaa joojin doona ardayga seddax maalmood ayada oo la tixraacayo nidaam hawleedyada aasaasiga ah.
3. Maareeyaha ayaa bilaabi doona nidaam hawleedyada ku saabsan joojinta dheeriga ah ama eryinta ardayga marka uu dhaco dhaawac ama hanti la burburiyo.
4. Maareeyaha ama qorshe dejiyaha ayaa warbixinta dhacdada u sheegi doona qareenka degmada ama wakaalada gudaha fulinta qaanuunka munaasibka ah ama sarkaal kaas oo dib u baari doona dhacdada si uu u xadido feelaynta dacwooyinka dembiga munaasibka ah ama bilaabida talaabo ka qaadista dembiga fudud ee la galay.
5. Nuqul siyaasadan ku saabsan ayaa loo qaybin doonaa arday kasta waxaana lagu soo dhejin doonaa dugsi kasta dhismihiisa.

La xariirka macluumaadka anshaxa

Maamulaha ama qorshe dejiyaha ayaa la xariiri doona macluumaadka anshaxa arday kasta oo lagu diiwan geliyay degmada dhammaan macalimiinta iyo la taliyaasha kuwaas oo la leh xariir toosan ardaygaasi. Macalin kasta ama la taliye kasta kaasi oo ku arka ardayga calaamad cadaynaysa in uu qabbo mushkilad akhlaaq oo halis ah waa in uu ku wargeliyaa diiwaanka akhlaaqda ardayda. Shaqaale kastoo dugsiga ee la siiyo macluuman waxay ahaanaysaa mid sir ah mana laga yaabo in qof kale lagala hadlo.

La ansixiyay 16 Juun, 2000

TIXRAACA SHARCIGGA.: C.R.S. 19-3-304 (3.5), (4)

C.R.S. 22-32-109 (1)(x)

C.R.S. 22-32-110 (4)(b)(II)

C.R.S. 22-32-126

C.R.S. 22-33-106 (1)(d)

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: JK, Anshaxa Ardayga
JKD/JKE, Dugsi Ka Joojin/Dugwi Ka Cayrinta Ardayda